



SO



A close-up photograph of a person's hands resting on a light-colored computer keyboard. The hands are positioned as if ready to type. The background is slightly blurred, focusing on the hands and the keys.

# *Faraha la iska qaado iyo eurodac*

Wabrixinta muwaadiniinta wadan sadexaad ama dadka aan waddan lahayn ee lagu helo inay si sharci darro ah ku joogeen waddan xubnaha ka mid ah, sida uu qabo qodabka 29(3) ee xeerka (eu) no 603/2013

Haddii lagugu helo inaad sharci darro ku joogitd wadan, 'Dublin katirsan<sup>1)</sup>, maamuladu waxay qaadi karaan farahaaga waxayna u gudbinayaan kaydka xogta ee la dhaho "Eurodac". Ujeedada tan looga danleeyahay waxay tahay oo kaliya in la arko inaad horey magangalyo u dalbatay iyo inkale. Xogta farahaaga laguma kaydin doono kaydka xogta Eurodac, laakiin haddii Aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale, waxaa dib laguugu diri karaa wadankaas.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistamka Dhexe ee Eurodac. Haddii Aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo Dublin katirsan, faraha lagaa qaado waxaa sidoo kale loo gudbin doonaa Eurodac. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

## Warbixinta xiriirada

### Diiwaanhayaha Eurodac iyo wakiilkisa

Meelaha lagala xiriiri karo:  
Maamulka booliska (Poliisihallitus)  
iyo Hoggaanka socdaalka  
(Maahanmuuttorasto)

### Halka lagala soo xiriiri karo xafiisyada diiwaanhayaha

Poliisihallitus (Maamulka booliska)  
PL 1000 (Vuorimiehentie 3),  
02151 Espoo  
+358 295 480 181  
kirjaamo.poliisihallitus@poliisi.fi

Maahanmuuttorasto  
(Hoggaanka socdaalka)  
PL 10, 00086 Maahanmuuttorasto  
tel: +358 295 430 431  
(xiriirinta telefoonnada)  
migri@migri.fi www.migri.fi

Haddii Aad doonayso inaad aragto macluumaadka adiga kugu saabsan ee lagu qoray nidaamka Eurodac, waxaad si shakhsiyah ah codsi ugu gudbisaa booliska.

**Haddii maamuladayada ay la noqoto in laga yaabo inaad wadan kale ka dalbatay magangalyo caalami ah kaasoo masuul ka noqon karay baadhista dalbashadaada, waxaad heli doontaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan nidaamka la raaci doono iyo sida ay u saamaynayo adiga iyo xuquuqahaaga.**

U diyaargaroow inaad caddayso aqoonsigaaga shakhsiyadeed. Waaan kuu soo jeedinaynnaa inaad la xiriirto xafiiska booliska ee kaa qaaday codsigaaga magangalyada. Halka lagala xiriiri karo: [www.poliisi.fi](http://www.poliisi.fi).

### Halka lagala xiriiri karo hay'adda ilaalinta xogta qaranka

Tietosuojavaltuutetun toimisto  
(Xafiiska wakiilkila ilaalinta xogta)  
Cinwaanka la tago:  
Lintulahdenkuja 4, 00530 Helsinki  
Cinwaanka boostada:  
PL 800, 00531 Helsinki  
Xiriirinta telefoonnada:  
+358 29 566 6700  
Telefoonka talsosiinta guud ee qofka shakhsiga ah:  
+358 29 566 6777  
talaada-khamiis,  
saacadda 9.00-11.00  
tietosuosa@om.fi  
www.tietosuosa.fi



1) Waxay ku durugsantaaydhamaan Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Lituaaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI)



Rajavartiolaitos  
Gränsbevakningsväsendet  
The Finnish Border Guard